Polisen

# Iskoolka waalidka **kuna saabsan daroogada**

Warbixin muhiim ah oo ku socota dadka haysta mas'uuliyadda sharci ee carruur kuna saabsan daroogada dhinaca dhallinyarada



Miyaad haysataa ilmo dhigta qaybta sare ee dugsiga dhexe ama dugsiga sare? Weydii ilmahaaga wixi ku saabsan daroogooyinka. Haddii aad welwelsan tahay waxaa jirta caawimaad la heli karo.

# Nabadeey waalidow!

Waanu ognahay in mararka qaarkood ay adkaan karto in la haysto ilmo dhowr iyo toban jir ah. Anagayaga ah booliska waxaan si maalinle ah ula kulanaa dhalinyaro oo waanu ognahay xitaa sida ay u fududaan karto in la helo daroogooyin. Sidaas darteed ayaa booliiska Matias iyo kuwa la shaqeeyaa ay si wadajir ah u diyaariyeen Iskoolka waalidka si ay kaaga caawiyaan in aad aragto oo fasirato calaamadaha isticmaalka daroogo ee dhinaca dhalaankaaga – sida ugu dhakhso badan ee suurtagal ah.

Iskoolka waalidka waxaad ka akhrinaysaa wixi ku saabsan ereyada suuqdiga ah ee maandooriyaha oo arkaysaa sawirada daroogooyin uu boolisku la wareegay. Miyaad ogeyd in tusaale ahaan duub yahay duub warqad oo xashiishad ama tobaako ah? In shanta, 5-ta, tantoomo, gacan, qayb dhan ama beshliik ay tahay erey kale oo u dhigma shan garaam oo maariwaana ah? Iyo in bensodiyasabiinada xitaa lagu magacaabo bensoo, habbar, garacad ama walax?

Waxa kale oo aad baranaysaa sida aad u garan karto waxyaabaha kala duwan ee dheeraadka ah ee la isticmaalo iyo nooca calaamadaha qofka isticmaala daroogooyin kala duwan laga arki karo. Waxaa kale oo aan soo qaadanaynaa cawaaqibka daroogadu keeni karto iyo sida aad samayn karto haddii aad ka welwelsan tahay in ilmahaagu isticmaalo daroogo.

## Miyaad welwelsan tahay?

Haddii aad ka welwelsantahay in ilmahaagu uu daroogada qaato, waxaa jira dhowr meelood oo aad xiriiri karto.

- Waxaad wici kartaa 1177 ama waxaad booqan kartaa 1177.se si loo helo caawimaad.
- Caawimaad ka raadso guddida caafimaadka ardayda, caafimaadka ardayda ama rug qaabilaad oo dhalinyaro: umo.se
- La xiriir adeega arrimaha bulshada ee degmadaada: kollpasoc.se/
- Ururada samafalka waxay leeyihiin kooxo taageera qaraabada iyo dadka leh dhibaato si xun u isticmaal walxo labadaba.
- Waxaad booliiska wargelin kartaa wixii ku saabsan dambi daroogo dhinaca polisen.se/tips



Matias Hasselström shaqadiisu waa booliis oo wuxuu badanaa la kulmaa dhalinyaro tijaabisay daroogo ama si xun u isticmaala walxo.

Wuxuu Iskoolka waalidka ka bilaabay baraha bulshada si uu sawir cad uga bixiyo daroogooyinka iyo isticmaalka daroogada, isla markaana u sharaxo cawaaqibkooda. Warkaas wuxuu gaaray boqolaal kun oo akhristayaal.

# Cutubka 1: Hel waxa sida xun uu ilmahaagu u isticmaalo

Daroogooyinka waxaa ku jira maandooriye iyo khamri labadaba. Maandooriye, ama mukhaadaraad oo xitaa lagu magacaabo, waa mamnuuc in la haysto, keydiyo, isticmaalo, la sameeyo (tusaale ahaan la beero), iibsado oo la iibiyo. Khamriga waa sharci daro in la iibiyo ama lagu casuumo dad ka yar 20 jir, marka laga reebo baararka iyo maqaaxiyaha cuntada halkaas oo xadka da'da yahay 18 jir.

Waalid ahaan waxaa adkaan karta in laga warhayo daroogooyinka ka jira dhanka dhalinyarada, sidaas darteed waxaan liista gelinay waxyaabaha dheeraadka ah iyo calaamadaha isticmaalka daroogada. Haddii aad heshay mid ka mid ah kuwa soo socda waxaa micnaheedu ahaan karaa in ilmahaagu isticmaalo daroogooyin.

## Warqad duuban

Warqad duuban, tusaale ahaan maarkada OCB iyo Rizla, waxaa loo isticmaalaa in lagu duubo sigaar gaar loo duubtay. Marka la duubo hal duub waxaa la isku dhex daraa xashiishad ama maariwaana si wadajir ah toobaako loo geliyay warqad oo la isku duubaa si loo cabo sida sigaarka.

Haddaad warqad duuban ka hesho ilmahaaga waxaa jirta khatar ah in ilmuhu cabo xashiishad. Warqaddan waxaa lagu iibiyaa dukaanada ay taalo tobaakada oo ma jirto wax xad da'da ah si loo iibsado warqaddan.

## Bacaha liidka guduudan

Bacaha liidka guduudan ama siibada waa baco yar oo wax laga dhex arki karo. Maandooriyaha waxaa badanaaba lagu keydiyaa baco, baakadaha gaboobay ee buuriga, gal warqad, baakad sigaar ama baakad xanjo.

## Raqdaha

Raqduhu waa qalab loo isticmaalo in lagu riqdo xashiishadda. Raqduhu wuxuu jiraa isagoo ah alaab ah bir, alwaax ama balaastig. Raqduhu badanaaba wuxuu leeyahay qaab wareegsan oo waxaa la sameeyaa isagoo ah laba ama afar qaybood. Xashiishadda la riqday ayaa lagu guraa warqad duuban oo loo duubaa duub ah xashiishad.

## Miisaan dijitaal ah

Iibiyaha ayaa isticmaala miisaan dijitaal ah si loo miisaamo maandooriyaha. Xitaa iibsadaha ayaa isticmaali kara miisaan dijitaal ah si loo hubsado in tiradu tahay sax. Haraaga maandooriye ka raadi miisaankan.

## Baakad sigaar ah

Baakadda sigaarka ayaa duubyada la diyaariyay ama inta nus laga cabay ee xashiishad ah lagu qarin karaa. Duub waa sigaar ay ku jirto xashiishad.

## Baakad xanjo

Baakad xanjo waa meel kale oo lagu qariyo maandooriye. Qaar badan ayaa xitaa calaashada xanjo ama isticmaala baarafuun si loo qariyo urta.




Warqad duuban iyo waxyaabaha dheeraadka ah




Miisaan dijitaal ah



Noocyada kala duwan ee raqdaha

## Gal warqad

Haddii aad qolka ilmahaaga ka hesho gal warqad oo hoosta ka cabaysan waxay ahaan kartaa calaamad ah in maandooriye laga dalbaday dhanka intarnatka oo lagu soo diray boosta. Weydii meesha galkan warqaddu ka yimi.

## Telafoono fudud

Kuwa iibiya waxay isticmaalaan telafoono fudud u isticmaalaan dhanka la xiriirka iibsadayaasha. Kuwa iibiya waa qof daroogada si sharci darro ah u iibiya (waxa kale oo lagu magacaabaa iibiyayaal). Tiro badan oo ah kuwa haya kaararka telafoonka waxay xitaa xiriir la yeelan kartaa maareynta maandooriye.

## Xiriirka lala leeyahay iibiye

Iibiye waxaa badanaaba lagula xiriiraa fariinta sms ama baraha bulshada. Dhalinyaradu waxay isticmaalaan aababka aan la jabsan karin sida Wickr, Whatsapp iyo Signal. Iibiyayaashu waxay jecel yihiin in ay helaan lacag kaash ah, laakiin waxay xitaa lacagta ku qaataan dhanka Swish.

Haddii aad aragto in ilmahaagu uu xiriir la leeyahay dad aan la garanayn, ama swish u diray lambaro aan la garanayn, waxay taasi ahaan kartaa calaamad ah in ilmahaagu xiriir la leeyahay iibiye. Maandooriyaha lagu dalbado intarnatka waxaa badanaaba lacagta lagu bixiyaa dhanka lacagta dijitaalka ah ee lagu magacaabo bitcoin.

## Daroogada dhanka iskoolka

Kuwa iibiya daroogada waxay badanaaba la xiriiraan dhalinyarada dhigata iskoolka. Ardayda ayaa ka dib daroogada ka iibin karta ardayda kale oo marar badan waxaa xiriirkan dhacaa iyadoo shaqaalaha iskoolka aanay waxba ka ogeyn.

Ardaydu badanaaba way ogyihiin dadka daroogada ku iibiya iskoolka laakiin booliiska waxaa ku adag inay macluumaad ka helaan iyaga. Dadka dhalinyarada ah waxaa loo jiidan karaa inay iibiyaan daroogo sababtoo ah waxay iyagu rabaan inay helaan lacag.

Bilowga hore waxay ahaan kartaa wax xiiso leh, ilaa ay noqdaan kuwa la khasbay oo ay ku adkaato inay dib uga noqdaan, laga yaabee sababtoo ah deyman ama si gaar ah walax u isticmaalid.

## Calaamadaha guud ee isticmaalka daroogo

- Ilmahaagu dan ma ka laha iskoolka
- Ilmahaagu wuu daalan yahay subixii
- Fariimo aan caadi ahayn oo ku soo dhacaya telafoonka ama kombiyuutarka
- Saaxiibo cusub oo aan la garanayn
- Lacag la waayayo
- Ilmahaaga oo lacag u diraya lambaro aan la garanayn
- Ilmahaaga oo u dhaqmaya in aad loo qarsado sirta



Noocyada kala duwan ee waxa lagu cabbo xashiishadda

# Cutubka 2: Noocyada kala duwan ee daroogo

Halkan waxaan liista gelinay noocyada kala duwan ee daroogo iyo calaamadaha aad ku garan karto in laga yaabee ilmahaagu qaato daroogooyin.

## Xashiishad

Xashiishaddu waa daroogada ugu badan gudaha Iswiidhan. Geedka xashiishadda ayaa laga soo saaraa xashiishad iyo maariwaana. Qiimuhu waa 50–150 karoon calaa garaam oo waxaa lagu go'aamiyaa dhanka nooca iyo tirada badnaanta la iibsanayo.

Adigu waa inaad u feejignaato haddii:

- Dharku urayaan in wax la cabbay ama xashiishad (in yar macaan)
- Aad heshay calaamad leh caleenta maariwaanada
- Ilmahaagu yiraahdo xashiishaddu waxay ahayd inay ahaato wax sharci ah
- Duub warqad ku jira jeebka

### Xashiishad

Xashiishaddu waa xabagta ka timi geedka xashiishadda ubaxiisa. Xabagtan ayaa laga tuujiyaa kubaddo. Midabku wuu kala duwanaan karaa, laga bilaabo bunni iftiin leh ilaa mugdi, ku dhowaad madow.

Fiiri ciddiyaha haddii aad ka shakido in ilmahaagu gacanta ku qabtay xashiishad. Haddii aad hesho uskag bunni ah waxay taasi ahaan kartaa haraa ka yimi markii ilmahaagu duubtay duub xashiishad ah ama qaabeeyay qayb ah xashiishad.

### Maariwaana

Maariwaana waa ubaxyada la qalajiyay ama qaybta sare ee geedka xashiishadda. Mararka qaarkood waxaa xitaa la isticmaalaa caleen iyo qaybaha kale ee jirridda. Maariwaanadu waxay leedahay midab cagaar ah oo u eegtahay xawaashyo la qalajiyay ama la daqiijiyay.

### Xaqiiq dheeraad ah kuna saabsan xashiishadda

Xashiishadda iyo maariwaanada waxaa lagu cabaa beeb ama sida sigaarka. Waxay jirtaa xitaa iyadoo ah noocyo nacnac adag oo fadhiya, xashiishad buskud ah ama iyadoo ku jirta kaabsosha saliida ee sigaarka korontada ku shaqeeya. Marka qofku isticmaalo xashiishad waxay raad ku yeelataa maskaxda si dhakhso ah oo sakhraddu waxay socotaa qiyaastii afar saacadood.
Xashiishadda urteedu waa xoog iyo wax yar oo macaan ah, oo urtan way adagtahay in la qariyo.

Xashiishaddu waa wax balwad ah. Haddii qofku isagoo dhalinyaro ah uu daroogo badanaaba isticmaalo waxaa korodha khatarta ah in lagu xirnaado. Daroogadn waxay raad ku yeelataa fikiryada iyo dareemada labadaba. Qaar badan ayaa u arka inay wanaag ku dareemaan in ay cabaan xashiishad. Waxay ku dareemaan deganaansho, waxaa u sahlanaata in la seexdo oo waxaa ka taga xanuunka iyo welwelka. Laakiin waa khatar maadaama wadnaha ay raad ku yeelato. Qofka xusuustiisa dhow ayaa xumaan karta oo waxaa ku adkaanaysa in la fahmo macluumaadka.

### Calaamadaha in ilmahaaga laga yaabee isticmaalo xashiishad

- Wadno garaacid sare
- Af qallal
- Indho guduudan
- Nadaafad daro
- Indho dhalaalaya
- Indhaha qaybtooda madow oo balaarta
- Daboolka indhaha oo laadlaada
- Gaajo ama u hamuun wax macaan
- Hadal badan oo ay adagtahay in la fahmo
- Daal
- Xilliyo qosol xoogan leh

### Maariwaanada waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa

Cagaar, W, caws, doog, xoor, dayaan, mary jane, marie iyo anna, hindi, farmaajo buluug, iniinyo.

### Xashiishad waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa

Bunni, afgaani, sutt, tooy, balaays, dux, goos, B.

Maariwaana ku jirta bacda liidka guduudan leh



Xashiishad malaasan



Duubab xashiishad ah



Nacnacyo xashiishad oo leh saliidda xashiishad




Tramadol



Ksalol

# Tramadol

Tramadol waa dawo yaraysa xanuunka oo ku sifeysan maandooriye. Booliisku waxay heleen kiniinyo guduudan oo leh qoraalka ”HAB 200 mg” iyo ”Signatur”. Kiniinyadan waxaa ku jiri kara fentaniil. Fentaniil waa daroogo ah aartifishal oo boqol jeer ka xoog badnaan karta moorfiinta.

Tramadol waxaa badanaaba lala isticmaalaa daroogooyin kale, gaar ahaan xashiishadda. Qiimaha hal kiniini wuu kala duwanaan karaa laakiin wuxuu yahay qiyaastii 25-50 karoon.

### Tramadol waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa

Lena, tram.

Calaamaduhu waxay keeni karaan niyad jab iyo walbahaar. Qaadashada badan ee tramadol waxay keeni kartaa muruq kookid xun, neefsiga oo adkaada ama dhimasho.

### Calaamadaha in ilmahaaga laga yaabee isticmaalo tramadol

- Heer tamar oo sareeya
- Shuban
- Yalaalugood
- Dhididyo
- Qarqaryo
- Muruq kookidyo
- Indhaha qaybtooda madow oo yaraataa iyo indhaha daboolkooda oo laadlaada
- Hadal ay adagtahay in la fahmo

# Xanor iyo ksalol (Alprazolam)

Xanor iyo ksalol waa dawo raad ku yeelata nidaamka neerfayaasha. Waxay ku jiraan kooxda bensodiyasabiinada kuwaas afka suuqdi ee daroogo lagu magacaabo bensoo. Kiniinkan wuxuu yareeyaa walbahaarka, welwelka, deganaansho la’aanta iyo xasilooni darada. Bensoodiyasabiin waxay keentaa natiijo dhakhso ah oo waxay noqon kartaa balwad.

Qofka ay balwad u tahay laakiin iska joojiya qaadashada daroogadan waxaa ku iman karta dhib ah in la waayay wixii la iska joojiyay. Maadaama dhibta in la waayay bensoodiyasabiin ay ahaan karto mid geeri keeni karta waxaa muhiim ah in la helo caawimaad dawo. Waa wax jira in daroogadan lagu daro khamri ama maandooriye kale. Qiimaha hal kiniin waa qiyaastii 10 karoon.

### Bensoodiyasabiin, xanor iyo ksalol waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa:

Bakoorad, miraha buluugga ah, buluug, bigs, xanax, habbar, garacadda, walax.

### Calaamadaha in ilmahaaga laga yaabee isticmaalo bensodiyasabiin

- Daal
- Madax xanuun
- Dawakhaad, dheeli tirnaan liidata
- Si yar u xanaaq
- Adkaanshaha in wax xooga la saaro
- Qallayl dhinaca afka ah
- Samaysanka candhuufta oo kordha
- Calool istaag
- Yalaalugood
- Rabitaanka cunta oo isbaddala
- Rabitaanka galmo oo isbaddala
- Miisaanka oo isbaddala
- Xanuun laabatooyinka ah
- Dhib in la kaajo
- Khalkhal
- Isbaddalo dabeecadda ah

## Calaamadaha halista ah ee bensoodiyasabiin

- Dhibaato in la neefsado
- Muruq kookid
- Finan maqaarka ah
- Indho hurdi ah
- Maqaar hurdi ah
- Niyad jab
- Fikrado ah in qofku naftiisa dhaawaco
- Ku adkaansho in wax la xusuusto
- Ku adkaansho in la hadlo
- Dhalanteedyo: qofku wuxuu arkayaa waxyaabo aan jirin

Amfatamiin



# Amfatamiin

Amfatamiin waa budo cad oo ah noocyo ah hurdi, midabka basaliga ama dambasiga ah. Amfatamiin badanaa waa wax dheg-dheg leh oo si xoog leh u urta sida ubaxyo iyo alaabta wax lagu nadiifiyo. Way jiraan xitaa iyagoo ah kiniin ama kaabsool. Daroogdan waxaa lagu qaataa neefsi, cabitaan ama irbad la raaciyo dhiigga. Qiimaha hal garaam waa 150–400 karoon.

Amfatamiin waxay keentaa isku kalsooni korodha oo sababtaa in qofku fir-fircoonaado. Qofka qaata daroogadan waxaa xumaan karta fikirkooda saliimka ah oo rabitaanka galmo ayaa kordha. Cawaaqibka amfatamiin wuu joogsadaa wakhti yar ka dib. Markaas ayaa qofka ay ku soo bixi kartaa dhibta ka timaada in balwad la iska joojiyay. Amfatamiin waxaa mararka qaarkood lagu keydiyaa qaboojiyaha barafka si loo hayo wakhti dheer.

Amfatamiin waxay ku jirtaa xitaa dawooyinka caadiga ah ee ADHD. Sidaas darteed ayaa dad ay mararka qaarkood ay dawadooda ADHD uga sii iibiyaan dad kale. Xitaa taasi waa sharci darro, waana waxyeelo la mid ah daroogooyinka kale.

## Waxyaabaha soo raaca amfatamiin:


- Baco balaastig ah oo yar
- Shaandheeye ah qaab ah cudbi ama qafisyada sigaarka
- Tuumbada nuugista oo la jaray
- Muraayad leh haraaga budo
- Qaadooyin leh haraaga budo
- Lacag warqad ah oo la duuduubay
- Irbado
- Kaarka amaahda bangiga oo leh hareerooyin jajabay

## Amfatamiin waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa

Isbiid, shaak, shoo, shoosan, foolxunta, dheg-dhega, soo jeediye, aafe, kabaha, raqiis, baraf.

## Calaamadaha in ilmahaaga laga yaabee isticmaalo amfatamiin

- Garaacid wadne oo korodha
- Kacsanaanta dhiigga oo sareeya
- Neefsi dhakhso ah
- Si yar u xanaaq
- Ku adkaansho in qunyar la fariisto
- Dheeli-tirnaan liidata
- Gariiryo ah jirka iyo wejiga
- Gaajada oo yaraata
- Walbahaar
- Ku adkaansho in la seexdo
- Isku buuq iyo khalad laga fahmo xaqiiqda
- Indhaha qaybtooda madow oo tigtigan
- Maqaar dhididsan
- Qallayl dhinaca afka ah
- Lahaanshaha tamar aad u badan



Ekstasii



Kaabsoolyo herowiin ah



## MDMA waa ekstasi

MDMA waxay badanaaba ku jirtaa kiniinyada ekstasii. Kiniinyadan waxay jiraan iyagoo leh midabyo, qaabab kala duwan oo leh calaamado kala duwan oo waxaa ku jiri kara dhowr nooc oo ah maandooriye. Hal kiniin wuxuu tusaale ahaan yeelan karaa calaamadda S, calaamada Subar Maan.

MDMA sifeysan waxay jirtaa iyadoo ah budo ama quraarado u eeg. Kiniinyada ayaa ugu raqiisan oo kuwa quraarada u eeg ayaa ugu qaalisan. Qiimaha hal kiniin waa qiyaastii 150 karoon oo kuwa quraarada u eegna waa qiyaastii 1 000 karoon calaa garaam.

MDMA waxay raad ku yeelataa fikradaha, dareemada iyo dabeecadda oo awoodda ku jirta kiniinyadan way kala duwanaan kartaa. Xilliga qaadasho qayb badan ma awoodo jirku inuu saxo heerkulka. Marka dareerahu yaraado iyo hawlaha jir ahaan laga qabto sida tusaale ahaan dhaansiga, markaas ayaa jirku aad u kululaan karaa. Sakhraddu waxay socotaa inta u dhaxaysa saddex iyo shan saacadood.

Qofka isticmaala MDMA wuxuu dareemi karaa murugo iyo farxad la'aan. Mararka qaarkood waxaa soo baxda isku buuqid taas oo keenta inay adkaato in la kala saaro khayaalka iyo xaqiiqda.

### MDMA/ekstasii waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa

Mooli, badhanada, farxad, XTC, EVA, E, Erik.

## Herowiin bunni ah

Herowiin waxay ka timaadaa dhirta oobiyam faalmo. Daroogadan waxay ahaan kartaa bunni ama caddaan laakiin gudaha Iswiidhan waa herowiin bunni ah caadi ahaan oo waxay u eekaan kartaa budo, dhagaxyo ama damaashiir.

Waxaa alumiiniyamta loo isticmaalaa in lagu diiriyo herowiinta oo uumiga ka kaca ayaa gudaha loo neefsadaa. Qiiqa iyo uumiga ka soo baxa daroogada wuxuu u uraa si xoog ah. Haddii aad hesho alumiiniyam leh dheg-dheg madow oo ku jira, taasi waxay ahaan kartaa haraaga herowiinta. Herowiinta qiimaheedu waa qiyaastii 800 karoon calaa garaam.

Sakhraddu waxay socon kartaa ilaa lix saacadood oo keeni kartaa dareen xoogan oo ah farxad. Dareemo ah walbahaarka, xanuunka iyo murugada ayaa qarsooma. Si dhakhso ah ayay u abuurantaa doonista herowiin dheeraad ah. Way dhici kartaa in qaadashada herowiin badan ay keeni karto dhimasho ama faalij.

### Herowiinta waxaa afka suuqdiga lagu magacaabi karaa:

Faras, horse, jonk, dop, khudrad, dope, H, madow, dhadhan yar.

### Dhibta ka timaada in la iska joojiyay

Dhibta ka timaada in la iska joojiyay balwad waa calaamadaha soo baxa marka qofku lahaa balwad daroogo, laakiin aanu qaadan muddo ama isku dayayo in la iska joojiyo.

### Calaamadaha in ilmahaaga laga yaabee isticmaalo MDMA/ekstasii

- Dareenka farxad xoogan
- Korodh dareen/ku kalsoonaan dadka kale
- Tamar korodha
- Indhaha qaybtooda madow oo weynaadaa,
- Garaacid wadne oo korodha
- Qallayl afka ah iyo dhaqdhaqaaqyo aan caadi ahayn oo carabka ah
- Didid badan

### Calaamadaha ah in ilmahaagu isticmaalo herowiin

- Indhaha qaybtooda madow oo yaraada
- Dabool indho oo laadlaada
- Hadal ay adagtahay in la fahmo
- Adkaansho in xiriir lala yeesho
- Jirka oo isku soo dhacsan
- Qofka oo caatooba oo iska ilaaliya iftiinka
- Wadne garaac hooseeya iyo neefsi gaabis ah

## Dhibaatooyinka caadiga ah ee marka la iska joojiyo herowiinta bunniga ah

- Dareen jiro ah
- Dhibaato dhinaca araga ah
- Sanka oo duuf ka dareerayo
- Garaaca wadne iyo cadaadiska dhiigga oo kordha
- Didid badan
- Yalaalugood iyo shuban
- Xanuun dhinaca muruqyada iyo laabatooyinka
- Ku adkaansho in la seexdo

# Khamri

Sida maandooriyaha oo kale ayaa khamrigu u yahay balwad. Dhalinyaradu mararka qaarkood way cabbaan si ay ula jaanqaadaan koox oo qaarkood waxay bilaabaan inay cabbaan khamriga isla xilli hore markay yihiin dhowr iyo toban jir.

Way dhacdaa in dhalinyaradu cabbaan fasaxyada, xilliga xiritaanka iskoolka iyo dabbaaldegyada. Laakiinse isticmaalka khamriga ee dhalinyarada hoos ayuu u sii dhacayaa sanad walba oo taga, maantana ardayda dhigta fasalka sagaalaad badankooda may cabbin khamri.

Haddii aad aragto ama ogaato in ilmahaagu tijaabiyay khamri waa inaad weydiiso halka khamrigaas ka yimi. Khamriga dhalinyaradu cabbaan waxaa la iibiyay si sharci darro ah oo qiimaha khamriga culus waa qiyaastii 100 karoon calaa litir.

## Calaamadaha in ilmahaaga laga yaabee cabbo khamri

- Hurdada oo xumaata
- Xusuus liidata
- Garasho liidata taas oo keenta in shilal dhacaan
- Dabeecad xun
- Lacagta oo badanaa dhammaata
- Calaamadaha soo noq-noqda ee ka dib isticmaalka daroogo sida madax-xanuun iyo yalaalugood



# Cutubka 3: Cawaaqibka isticmaalka daroog

In la isticmaalo daroogooyin wakhti dheer waxay dhaawici kartaa caafimaadka, laakiin waxaa jira xitaa cawaaqibyo kale. Tusaale ahaan ka baxsanaan bulshada, dhibaato is masruufidda ah iyo dambiilanimo la xiriirta isticmaalka daroogada. Xitaa iskool dhigashada ayay raad ku yeelan kartaa.

Iswiidhan waxaa mamnuuc ah in la haysto, keydiyo, isticmaalo, la sameeyo, iibsado iyo in la iibiyo maandooriye. Waa dembi lagu mutaysan karo ciqaab xabsi ah.

Haddii booliisku la kulmo qof dhalinyaro ah oo laga shakisanyahay inuu qaatay maandooriye waxaa la baaraa jirkooda. Haddii ilmahaagu ka yaryahay 18 jir waa in adigu waalid ahaan aad wada shaqayn samayso xilliga wareysiga. Xitaa adeega arrimaha bulshada ayaa lagu casuumaa inay joogaan xilliga wareysigan.

Si loo arko haddii ilmahan qaatay maandooriye waxaa laga qaadaa baaritaan kaadi iyo mararka qaarkood baaritaan dhiig. Jawaabtu waxay timaadaa gudaha 2–3 toddobaad. Haddii ilmahaaga aanay maandooriye ku jirin dhiiggiisa waxaa dhici karta in ilmahan lagu tuhunsanyahay dhinaca iibinta ama qaadista maandooriye.

Dhalinyarada u dhaxaysa 15–18 jir waxaa lagu dacweeyaa dambi maandooriye oo booliisku baaro. Dhalinyarada ka yar 15 jir waxaa booliisku la xiriiraa dadka haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmaha oo waxaa la wargeliyaa adeega arrimaha bulshada.

## Talo ku socota adigaaga ah waalid

- Su'aalo weydii oo la hadal ilmahaaga.
- Soo jeed marka ilmahaagu imanayo guriga.
- Urso! Baarafuun iyo xanjo waxay qarin karaan urta.
- Feejignaan u yeelo haddii ilmahaagu isticmaalo dhibcaha indhaha. Dhibcaha indhaha waxay qariyaan indhaha guduudan ee jiri kara haddii ilmuhu cabbo xashiishad.
- Ka warhay ilmahaaga barahiisa bulshada.
- Ka warhay waxa ilmahaagu ku iibsado lacagtooda toddobaadlaha ama bil ahaan ah.
- La hadal waalidka kale oo iska caawiya inaad ka warhaysaan, ku heshiisaan qawaaniin wadajir ah oo loogu talogalay carruurtiina.
- Ilmahaaga dhowr iyo toban jirka ah kala hadal wixi ku saabsan khamriga, xafladaha iyo in xilli dambe banaanka la joogo habeenkii.
- U noqo tusaale fiican, ka fikir adiga laf ahaantaada caadooyinkaaga khamriga.
- Diyaar u ahow in aad baxdo habeenkii haddii ay wax dhacaan.
- Wac booliiska haddii wax dhacaan. Haddii ay tahay xaalad deg-deg ah wac 112, haddii aanay sidaas ahayn wac 114 14.

Iskoolka waalidka wuxuu ku dhisanyahay booliiska macluumaadkooda oo meelaha laga soo xigta waa:

- Ururka dhexe ee macluumaadka khamriga iyo maandooriyaha iyo drugsmart.com (hawsheeda waxaa wada CAN)
- Hey'adda dawladda ee dawooyinka – maandooriye
- beroendecentrum.se
- 1177
- umo.se

---

**Soo saaraha**
Booliiska
Juun 2022

**Wax soo saar**
Qaybta xiriirka

**Sawir**
Booliiska

polisen.se

Polisen